

## **Guddiga Maamulka Maaliyadda: Hadal Qoraalka kulanka oo kooban**

**Kulanka 50aad ee 19ka Janaayo 2021**

**Miisaaniyadda 2021:** Shir Gudoomiyaha ayaa ka warbixiyay ansixinta miisaaniyadda sanadka 2021 ee uu meel mariyay Baarlamaanka, sidoo kale uu Madaxweynuhu saxiixay. Waxaa uu sheegay in Wasaaradda Maaliyadda ay ka shaqeneyso sare u qaadidda dakhliga gudaha iyo sidii deeqaha ay Qaramada Midoobay siineyso Heyadaha Dowladda Federaalka Soomaaliya (DFS) loogu soo dari lahaa kabka miisaaniyadda ee sanadka 2021.

**Siyaasadda Maamulka Maaliyadda:** Wasaaradda Maaliyadda ayaa kulamada Golaha Wasiirada kaga warbixiyay saameynta maaliyadeed ee sharciyada cusub iyo in Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud uu dhigayo in dhammaan hindise sharciyeeydadu soo maraan Wasaaradda Maaliyadda kahor inta aan loo gudbinin Golaha Wasiirada ama Baarlamaanka, si wax looga qabto saameynta taban ee maaliyadeed ee ka dhalan karta. Guddiga Maamulka Maaliyadda waxaa uu tixgeliyay baahiyaha deg deg ah ee dhanka sharciga ah ee ka jira Wasaaradda Maaliyadda, ee lagama maarmaanka u ah dib u eegidda sharciyada iyo saameyntooda. Kulanka waxaa looga hadlay halka ay mareyso ururinta deymaha diyaaradaha hawada Soomaaliya isticmaala iyo u tarjumidda Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud luqadda Ingiriiska.

**Arrimaha Batroolka iyo Gaaska:** Kulanka waxaa looga hadlay waxyaabihii ka soo baxay kulankii arrimaha batroolka ee dhexmaray DFS iyo beesha caalamka (Heyadda Lacagta Aduunka, Bankiga Aduunka, xubnaha Guddiga Maamulka Maaliyadda). Guddiga Maamulka Maaliyadda ayaa ku amaanay Shir Gudoomiyaha dadaalada uu ku bixiyay qabsoomidda kulankaasi iyo isku keenida dhinacyada ay quseeyso, si looga wada hadlo arrimaha ka soo kordhay ruqsad bixinta batroolka. Guddiga Maamulka Maaliyadda waxaa uu diyaariyay Talo bixin la xiriirta ruqsad bixinta batroolka si loo xaqiijiyo in dhammaan ruqsadaha ay maraan nidaamka iyo ilaalinta danaha dhaqaale ee DFS. Kulankaan ayaa looga hadlay arimo dhowr ah oo muhiim ah oo ay kamid yihiin wax ka badalidda Heshiis Wax Soosaar Wadaaga iyo nidaamka qandaraaska, Sharciga Canshuuraha Dakhliga Wax Soosaarka, ku dabaqidda Sharciga libka Guud howlaha batroolka iyo doorka Guddiga Wasaaradaha ee Qandaraasyada ee ruqsad siinta batroolka iyo gaaska.

**Heshiiyada iyo Qandaraasyada:** Wasaaradda Maaliyadda waxay soo bandhigtay qandaraasyo raashin ah oo loogu talagalay Ciidanka Xoogga, Booliska, Nabad Sugidda iyo Asluubta, kuwaasi oo la xayey siiyay, kuna eg 26-ka Janaayo 2021.